


Nin oday ah marku ninkaaga yahay
Un vieil homme comme mari



Aranya   Sunniva Høiby-Øiset  Mohamed Abdirashid
5  Soomaali  / français 




LIDA Stories
lidastories.net

**Nin oday ah marku ninkaaga
yahay / Un vieil homme comme
mari**

Aranya   Sunniva Høiby-Øiset  Mohamed Abdirashid (so), Zina (fr)



This work is licensed under a Creative Commons
[Attribution 4.0 International License](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0).
<https://creativecommons.org/licenses/by/4.0>



Waxaan u maleeynaye in ragga Norwiiijiga ay yihiin ragga ugu fiican adduunka, balse taasi run maaha! Kahor intaan la kulmin ninka noqday ninkayga, waxaan ka shaqeeynaye Warshad ku taal Bangkok, wuxuu ku noolaa Pattaya. Waxaan ku kulanay internetka oo aan ugu dambeyntii noqonnay lamaane.

...


Je pensais que les hommes norvégiens étaient les meilleurs hommes au monde, mais cela n'est pas vrai ! Avant de rencontrer l'homme qui est devenu mon mari, je travaillais dans une usine à Bangkok, et il vivait à Pattaya. On s'est rencontrés sur internet et on s'est finalement mis en couple.



Muddo ka dib waxa aanu go'aansanay in aanu is guursano. Waxaan ka soo jeedaa qoys sabool ah, markaa in aan haysto nin ajnabi ah oo daryeeli kara qoyskayga waxay qayb ka ahayd sababta aan u guursaday.

...

Après un moment, on a décidé de se marier. Je viens d'une famille pauvre, donc avoir un mari étranger qui pourrait prendre soin de ma famille était l'une des raisons de mon mariage.




Waxaan u soo guurnay Norway, waxaanan bilaabay in aan aado iskool si aan u barto Norwejiga. Waxay ahayd waqti adag. Maan haysan shatiga darawalnimada, ninkaygu waxa uu ku qasbanaaday in uu ii kaxeeyo iskoolka, isugo, dibna isoo celiyo. Waxay ahayd meel saacad noo jirta. Muddo ka dib waanu isku soo dhawaanay, laakiin wuxuu weli ku adkaystay inuu iskoolka ii wado. Ma uu rabin in aan keligay socdo.

...

Nous avons déménagé en Norvège, et j'ai commencé à aller à l'école pour apprendre le Norvégien. C'était des temps difficiles. Je n'avais pas mon permis de conduire, et mon mari devait me conduire à l'école, m'attendre, et rentrer en voiture. Cela faisait une heure de trajet. Au bout d'un moment, nous avons emménagé plus près, mais il insistait toujours pour me conduire à l'école. Il ne voulait pas que je marche seule.


Ma garanayo waxa mustaqbalka noqon doono. Qorshahaygu waa inaan iskool kale aado, laakiin ninkaygu ma rabo inaan taas sameeyo. Waxa uu qorshaynayaa inuu iga sii fogaayo si uu iigu adkeeyo. Waxaan rabaa inaan iska celiyo, laakiin ma garanayo sida. Ma fududa in dal shisheeye kula noolaado nin oday ah sidii ninkayga oo kale sida aan moodayay inay noqon doonto.

...




Wax lacag ah ma helin tan iyo markii aan Norway imid. Mar ninkaygu wuxuu i siiyay lacag aan ku qadeeyo, laakiin maadaama aan haysto lacag aad u yar, waan xafiday. Saaxiibadayda iskoolka waxay rabaan inay i caawiyaan si aan shaqo u helo, laakiin ninkayga wuxuu leeyahay ma awoodi karo. Uma maleynayo aan ka shaqada nadiifinta aysan igu habbooneen aniga.

...




Je n'avais que très peu d'argent depuis que j'étais venue en Norvège. Une fois, mon mari m'a donné de l'argent pour le déjeuner, mais puisqje je n'avais pas d'argent, je l'ai gardé. Mes amis à l'école veulent m'aider à trouver du travail, mais mon mari dit que je ne peux pas. Il pense que travailler comme femme de ménage n'est pas convenable pour moi.



Taa beddelkeeda shaqo kale ayuu ii qabtay – oo ah dhisitaanka geerashka. Waxa uu ahaa masuulka anigana wax walbana waan sameenayey. Wax badan ma uu qaban karin sababtoo ah wuu xanuunsanaa. Lacagtii uu ku dhisay geerashka waxba igamuusan siin.

...

À la place, il avait un autre travail pour moi — construire un garage. Il était le patron et je faisais tout. Il ne pouvait pas faire grand-chose car il était malade. Il ne m’a rien donné de l’argent qu’il a gagné en construisant le garage.



Maalin ayuu yiri waan ku caajisaa markuu guriga keligiis joogo, markaas ayuu go’aansaday inaan ey keensano. Ma rabin eey maadaama aan daalanahay iskoolkaa ka dib, waxaanan lahaa casharo la iga rabo inaan kaga shaqeeyo guriga. Waxa uu sheegay in uu socodsiin doono eeyga maalin kasta, laakiin ugu dambeyntii waa in aan daryeelo labadaba eeyga iyo ninkeyga odayga ah.

...

Un jour, il a dit qu’il s’ennuyait quand il était seul à la maison, donc il a décidé qu’on devrait avoir un chien. Je ne voulais pas de chien puisque j’étais fatiguée après l’école et que j’avais des devoirs à faire. Il a dit qu’il l’emmènerait en balade tous les jours, mais finalement, j’ai dû m’occuper à la fois du chien et de mon vieux mari.